


CCS ELEVATE

COLUMBUS CITY PREPARATORY SCHOOL FOR BOYS

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad- raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyaad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.



Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maaajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.

Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha Guud waxay ku talinayaan in Guddiga Waxbarashadu xiro **Dugsiga Diyaarinta Wiilasha (Preparatory School for Boys) ee Magaalada Columbus (1962)** oo ay ku soo dhaweeyaan ardaydaan dugsiga u Diyaarinta gabdhaha (Preparatory School for Girls) ee magaalada Columbus.

Dugsiga Diyaarinta gabdhaha (Preparatory School for Girls) ee Columbus (1975) wuxuu u-adeegi karaa 485 arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2023-2024, 199 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-gelisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 42%.

Wiilasha (CCPS Boys), wuxuu ku yaallaa dhanka bari ee magaalada, ayaa hadda iska diiwaan-gelisay 82 arday. Isku-dubbaridka Wiilasha CCPS ee goobta Gabdhaha CCPS waxay si fiican uga faa'iidayaan doontaa dhismaha iyada oo la filayo ka faa'iidaydiga 59%. Barnaamijka Wiilasha ee CCPS Boys wuxuu hadda ku jiraa dhismo u baahan dib-u-dayactir mug leh. Kharashka dib-u-cusboonaysiintan ma aha mid xaq ah, marka loo eego diiwaan-gelinta yar ee dugsiga. Waxaa la qaadi doonaa tillaabooyinka lagu bixinayo boosas lab iyo dheddig ee dugsi kasta si loo

taageero qaab-kooda waxbarasho.

